



Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Janaayo 24, 2022

Ku socota: Shaqaalaha Taageerada Shakhsiyeed (PSW-yada)

Ujeedada: Is xasuusinta tababarka la iskaga baahan yahay

Labadii sano ee la soo dhaafay, ODDS ayaa kula wadaagtay macluumaad ku saabsan Sharciga Senate-ka 1534. Wuxuu tababar uga baahan yahay PSW-yada **Sharci ahaan, shaqaalaha hadda ahaan, waa in aad tababarka dib u eegista ee la iskaga baahan yahay ku dhammeysataa muddo aan ka dambeyn Maarso 31, 2022.**

Waxaan rabnaa in aan xaqiijino in aad haysato wax kasta oo aad u baahan tahay si aad isku diiwaan geliso. Haddii aadan ku dhammeystirin tababarka muddo ku beegan Maarso, 31, waxaad heli doontaa ogeysiinta iska joojinta ijaarka mana awoodi doontid in aad adeegyo u bixisp PSW ahaan.

Haddii aad dhammeysatay labada koorsooyinba — “Dib u eegistu Dhanka Internet-ka” iyo “Aqoon isweydaarsiga dib u eegista” — ma jiraan wax aad adigu u baahan doonto in aad sameyso.

Haddii aadan dhammeysan koorsooyinka “Dib u eegistu Dhanka Internet-ka” iyo “Aqoon isweydaarsiga dib u eegista”:

- Iska diiwaan geli <https://www.carewellseiu503.org/training/>. Dooro “Tababarka Dib u eegista ee Shaqaalaha Hadda Jira.”
- Tababarka ee 12 saacadoodka ah waxaa ka mid ah kulamada dhanka internet-ka oo toos ah iyo kooxaha qofka waqtigiisa ku xiran ‘self-paced’. Waad joojin kartaa oo aad keydsan/badbaadin kartaa horumarkaaga.
- Waa in aad dhammeysataa mid kasta oo ka mid ah tababarada xataa haddii aad sidoo kale u shaqeyso shaqaalaha daryeel guriga iyo shaqaalaha daryeelka gaar ahaaneed ahaan.
- Ka dib marka si guul leh loo dhammeysto tababarada, Carewell SEIU 503 Training waxay kuu soo diri doontaa lacago lagu helo tababarka ‘stipends’ oo dhan \$200.

Hal ka reeban shuruudaha

Haddii aad hadda haysato shahaado ay ku siisay Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon (OHCC), uma baahnid in aad qaadato aad tababarka dib u eegista. Shahaado bixinta waxaa ka mid ah:

- Shahaadada Aqoonsi ee Horumarinta Xirfadeed (PDC), kuwaasi oo ay ku jiraan gargaarka degdega ah iyo CPR-ka.
- HCW La xoojiyay ama PSW.
- PSW Gaarka ah.

Su'aalaha

Haddii aad hayso su'aalo ama aadan xasuusan haddii aad dhameysatay tababarka:

- Carewell SEIU 503 Training ka wac 1-844-503-7348.
- Email u dir Diiwaan gelinta Daryeel Bixiyaha PSW.Enrollment@dhsola.state.or.us.

Macluumaad dheeraad ah

- Fiiri dokumentiyada ku lifaaqan.
- Su'aalaha Inta Badan La Iska weyddiyo oo ku saabsan tababarka la iskaga baahan yahay ayaa la helayaa iyaga oo ku qoran [Ingiriisi](#), [Arabic](#), [Af-Ruushka](#), [Simplified Chinese](#), [Soomaali](#), [Isbaanish](#) iyo [Vietnamese](#).
- Dokumentiyo iyo [warbaahinta dhanka maqalka](#) oo ku saabsan tababarka ayaa laga helayaa internet-ka <https://go.usa.gov/xtBmG>.

Waanu qiimeynaa wax kasta oo aad u sameyso si aad u caawisaan dadka reer Oregon ee dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka . Waxay ku tiirsan yihiin taageerada aad bixiso. Waxaan kuu soo horumarinaynaa mahad celin la xiriirta ka dhammeysashada tababarka ee Maarso 31.

Si Daacadnimo leh,

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.